# AWOODDA KAYDKA AH EE DHULKA OOMANAHA 1: BAAHIDA LOO-QABO QORSHAYNTA ISKU-DHAFAN

## MAXAY-TAHAY QORSHAYNTA ISKU-DHAFAN

Waa qorshayn qaybo badan khusaysa oo isku-xidhaysa deegaanka iyo qaranka, gurmadka iyo horumarinta iyo mushtamacyada oo ay heerka seentarka haweenkuna ku-jiraan

## MAXAY-TAHAY SABABTA LOOGU-BAAHDAY ISKU-DHAFIDDA

Waa isku-xidhnaanshaha bulsheed, deegaaneed iyo dhaqaaleed ee ka-jira dhulka oomanaha ah

## SIDEE LOO-SAMAYN KARAA?

- ◊ Horumarinta qorshaynta hoos ka-soo-bilaabmaysa: In go'aaminta arrimaha mudnaanta yeelanaya iyo qorshayaashu ay dhinaca mushtamacyaa ka-yimaaddaan
- ◊ Ka-soo-qayb-galinta xubnaha mushtamaca ee nugul iyo kuwa uu gaadhitaanku adag-yahay
- ◊ La-xidhiidhinta iyo taageeridda geeddi-socodyada qorshaynta dawladda, gaar-haan qor-shaynta isticmaalka dhulka
- ◊ Ku-soo-daridda qorshaynta tallaabooyinka wax lagaga qabanayo halisaha iyo isbaddelka cimilada
- ◊ In la-xaqiijiyo in qorshayaashu ay noqdaan kuwa ku-xidhan dhammaan xuduudaha maa-muleed iyo kuwa qaran; tusaale: dhinaca biyo-dhacyada, nidaamka nolosha xayawaanka iyo dhirta



# AWOODDA KAYDKA AH EE DHULKA OOMANAHA 2: BAAHIDA LOO-QABO HORUMARINTA BIYAHA EE ISKU-DHAFAN

**XUBNAHA MUHIIMKA AH**

◊ Isticmaalka (gudaha, xoolaha, dalagga) iyo qorshaynta heerka goobaha taagga ah ee togagga/wabiyada kala-sooca

◊ Isku-dhafidda qorshaynta gurmadka iyo horumarka

◊ Horumarinta helitaanka biyaha ee dhammaan mushtamaca

## SIDEE LOO-SAMAYN KARAA?

| | |
|---|---|
| ◊ Waa goobta, qorshaynta iyo maaraynta goobaha biyaha **lagala tashado dhammaan xubnaha mushtamaca**, gaar-ahaan haweenka<br>◊ **Waa in goob habboon laga-sameeyo,** tusaale: meel suuqa iyo waddooyinka lamaro u dhaw, waana in aan la-samayn xilliga oomanaha | ◊ Xaqiijinta mulkiilanimada iyo ma-mas'uul-ahaanshaha iyo cad-caddaanida maaraynta.<br>◊ Horumarinta sancooyinka habboon ee biyaha tashiilaya<br>◊ In la-ogaado isku-dhacyada danaha ee dhex mari kara aqoon-yahaniinta iyo wakiilada horumarka; tusaale: soo-dhaaminta biyaha |



# AWOODDA KAYDKA AH EE DHULKA OOMANAHA 3: IN LA-HIRGELIYO BEERAHA DALAGGA EE WARAABKA

## DHINACA DHAQAALAHA

◊ Waxaa badanaa la-buun-buuniyaa awoodda kaydka ah ee dhinaca biyaha iyo dhaqaalaha
◊ Waxaa la-yareeyaa kharashka hawlgalka iyo dayactirka kaabayaasha dhaqaalaha
◊ Qiyaasta qiimaha isticmaalka soo-jireenka (tusaale: wax-soo-saarka balaadhan ee xoolaha) ayaa la-yareeyaa, waxaana loo-taageeraa si liidata

## DHINACA DEEGAANKA:

◊ Biyaha lumaya inta ay biyuhu hoos u sii qulqulayaan
◊ Carra-guurka
◊ Cusbada carrada dhex-galaysa
◊ Ciidda moosmaysa
◊ Lumitaanka noocyada kala-duwn ee naflayda (xayawaanka iyo dhirta)
◊ Wasakhoobidda deegaanka ee ka-imanaysa bacariminta

## DHINACA BULSHADA:

◊ **Yaa faa'iido helaya?** – kuwa haysta dhul/raasamaal/ cudud shaqaale oo dheeraad ah/dad badan
◊ **Yaa khasaaraya?** – kuwa xilliga oomana dhulka daaqa u isticmaala
◊ **Miyey korodhay halistu?** – masiibooy-inka daadadka/abaaraha/ isku-dhaca/ qiimayaasha

## SIDEEBAA WAX LOOGA-QABAN KARAA:

◊ **Waa in dadka lala-qorshaysto**, waana in la-xurmeeyo xu-lashadooda nololeed ee garashada ku-salaysan
◊ **Waa in cashar laga-qaato arrimahii hore ee dhacay,** oo la-qiimeeyo saamaynta iyo casharka la-bartay
◊ **Waa in la-horumariyo waxaalaha dhammaystirayaasha u ah nolosha;** goobaha xoolaha la-daajiyo, isticmaalka haad-haayada dalagga, xaarka xoolaha
◊ **Waa in la-xaqiijiyo jiritaanka maalgelin ku-filan:** cudud shaqaale, waddooyin, gaadiid iyo amni
◊ **Isticmaalka arrimaha cusub ee la-soo-saarayo** ee la-xidhiidha dhulka oomanaha

